

Taar: 12/09/2026



ACSOS2026

AQOONISWEYDAARSIGA SANNADLAHA 13AAD EE CILMIBAARISTA SOOMAALIYEED

08-10 Diisambar 2026, Muqdisho

BAAQ QORAALLO & DOODO- CALL FOR PAPERS & PANELS

Waxaa sharaf noo ah inaan idinla socodsiinno in *Aqoonisweydaarsiga Sannadlaha 13^{aad} ee Cilmibaarista Soomaaliyeed (The 13th Annual Conference on Somali Studies - ACSOS2026)*, la qabanayo **08-10 Diisambar 2026**; laguna qabanayo Muqdisho, Soomaaliya.

Aqoonisweydaarsiga Sannadlaha ee Cilmibaarista Soomaaliyeed (ACSOS), oo la bilaabay sannadkii 2014, ujeedkiisu waa kobcinta dhaqanka cilmibaarista iyo in si cilmiyaysan loo lafaguro arrimaha Soomaalida iyo guud ahaanba Geeska Afrika. Waxaa si joogto ah u qabanqaabiya *Machadka Daraasaadka Soomaaliyeed (ISOS)*, oo kaashanaya jaamacadaha iyo xarumaha cilmibaarista.

Shirku wuxuu diiradda saarayaa fahamka isbeddellada bulshada, siyaasadda, dhaqaalaha, dhaqanka iyo tiknolojiyadda ee saamaynaya Soomaaliya iyo Geeska Afrika, iyadoo la dhiirrigelinayo cilmibaaris cusub oo xalal iyo aragtiyo waxtar leh soo bandhigta.

Yaa ka soo Qaybgelaya?

Waxaa lagu martiqaadayaa aqoonyahannada, cilmibaarayaasha, macallimiinta jaamacadaha iyo khubarada kaleba inay soo gudbiyaan qoraallo (papers/abstracts) iyo doodo (panels) ay kaga qaybgelayaan ACSOS2026; oo ku qoran mid ka mid ah luqadaha English, Carabi ama Soomaali.

Mawduucyada

Qoraallada iyo doodaha waxaa laga soo gudbin karaa mawduuc kasta oo ka hadlaya arrimaha Soomaalida, sannadkanna waxaa mudnaan gaar ah la siinayaa mawduucyada kala ah:

1. Bulshada, dhaqanka, afka & suugaanta, iyo taariikhda
Society, culture, language & literature, and history

2. Siyaasadda, maamulka iyo qaanuunka
Politics, governance and law
3. Baraha bulshada, warbaahinta dhijitaalka iyo tiknooloojiyada
Social media, digital platforms and technology

Hannaanka soo Jeedinta

- Muxaadaro/erayo khubaro lagu martiqaaday (keynote speeches)
- Soo jeedin cilmibaaris (paper presentations)
- Nadwooyin (panel discussions)

Fadhiyada qoraallada (*presentation sessions*) waxaa markiiba la soo bandhigayaa 2-3 qoraal oo mawduuc guud wadaaga. Qoraal kasta waxaa loo qoondeeyay 15-20 daqiiqo.

Fadhiyada aqoonwadaagga (*panel discussions*) waxaa doodda wadaagaya 3-4 qof.

Taariikhda iyo Habraaca

Mucda qoraalka ama doodda (abstracts) waxaa la soo gudbinayaa:

laga bilaabo **10 Oktoobar 2026**

ugu dambayn **31 Oktoobar 2026**

Ku qoran barnaamijka **Microsoft Word**, ahna **200-400 eray**.

Luqadda qoraalku waa **English, Carabi ama Soomaali**.

Waxaa la soo raacinayaa **macluumaadka shakhsiga (biography)**

Waxaa lagu soo dirayaa emailka acsos@mu.edu.so

Dhammaan qoraallada iyo doodaha la soo gudbiyo waxaa qiimayn doona guddiga cilmiga ACSOS2026, iyadoo lagu saleynayo tayada cilmibaarista muhiimadda mawduuca iyo wax-ku-biirinta aqooneed.

Taariikhda ACSOS2026 waa **08-10 Diisambar 2026** (Talaado, Arbaco & Khamiis).

Goobta lagu qabanayo waa **Muqdisho**.

Baraarujin

Waxaan boorinayaa in mucda qoraallada (abstracts) la sii dhamaystiro, lagana dhigo qoraallo buuxa (papers) oo la raacay halbeegga cilmibaarista. Taasi waxay suurtagelinaysaa in daraasadda oo qoran lagu faafin karo 'Somali Studies: A Peer-Reviewed Academic Journal for Somali Studies', iyagoo mari doona habka qiimeynta joornaalka.

Wixii faahfaahin dheeraad ah, fadlan nagala soo xiriir acsos@mu.edu.so

Ka soo qaybgal wacan

Ka qaybqaado dhalinta aqoonta!

Be a part of knowledge